© AP/PA Photo/Farah Abdi Warsameh

WEERARADA LAGU HAAYO CARUURTA SOMAALIYEED

AMNESTY INTERNATIONAL

”Waxaa ay ahayd sanadkii 2009. Gurigeena ayaa waxaa ku soo dhacay madfac ka dibna waxaa canugeeyga gacanta ugu dhacay bulukeetigii guriga. Madfacan dartiis ayaa wiilkeeyga kale waxaa uu lumiyay araga. Madfacan ayaa waxaa iga dhintay ilaa sadex canug oo aan dhalay kuwasi oo kala jira 12, 10 iyo 8 sano. Hooyadeey iyo aabaheey ayaa sidoo kale waxaa ay ku dhinteen duqentaani.”

Waxaa sidani yiri qof haweeney ah oo magalada muqidhos ka soo tagtay bishii Aprill ee 2010.

Ilmaha iyo dadka dhalinyarada ah ee ku nool konfurta iyo bartamaha Somaaliya ayaa waxaa ay yihiin kuwo halis badan ugu jiro werarada loo geesto maalin kasta. Noolashood ayaa waxaa ay tahay mid halis ku jirto iyaga oo anan lahayn wax mustaqbal wanaagsan ah tasi oo ay sabab u tahay xadgudubyada xaquuqda aadanaha iyo colaada dabada dheeratay.

Marka laga hadlaayo wadan aan lahayn dowlad mudo dhan 20 sano ayaa waxaa gabi ahaanba meesha ka baxay adeega bulshada, kala dambeynta iyo sharciga iyo sharafka xaquuqda aadanaha kuwasi oo dhamaantood lagu xadgudbay. Afartii sano ee la soo dhafay ayaa waxaa aad hoos ugu dhacay xaqa ay caruurta iyo dhalinyarada u leeyihiin in ay helaan cuno, biyo, waxbarasho iyo dawo.

Caruur badan ayaa waxaa ay ku dhimanayaan colaada kas ii soconeyso konfurta iyo bartamaha Somaaliya ayaga oo ku dhimanaya duqeeymaha ayada oo aan loo meel dayin ee loo geysanayo shacabka iyo waliba ayada oo aan la kala saarin dadka hubeysan iyo shacabka caadiga ah. Waxaa ay lumiyaan saxibadood iyo qaar ka mid ah reerkooda ka dib markii rasaasi iyo hoobiye yaal lais weedaarsado. Iskoolad kooda iyo guryahooda ayaa waxaa ku dhaco burbur aad u tira badan halka macalimintooda la cabsi galiyo. Kuwo badan oo ilmahani ka mid ah ayaa waxaa ay ka lumaan qoysaskooda xiliga ay dagaalada socdaan.

”Waxaan magalada Baydhabo la daganaa hoyaadeey iyo afar wiil oo ila dhalatay iyo gabdho ila dhashay. Aabaheey waxaa u ku dhintay qarax bilo yar ka hor. Markii uu dagaalka bilowday ayaa ayaa dad badan waxaa ay u qaxeen meel magalada u dhaw. Tuulada ayaa waxaa soo weeraray Al-Shabaab ka dibna waan ka cararnay ka dibna waxaan ku dhuuntay meel duur ah. Xiligaan ayaa waxaa ay ahayd markii aan hoyadeey ka lumay. Ma garaneynin meel aan aado waana lumay. Waxaan raba in aan Baydhabo ku noqdo. Waxaa magalaba igu soo xirtay magaalo. Intii aan soo socday wadada dadkii aan la kulmayay waxaa ay i sinayeen biyo iyo caano. Ugu dambeyntii waxaan imid Dadaab.”

Warkaan waxaa yiri canug 14 sano jiro oo xarada qaxootiga ee Dadaab yimid bishii Marso ee 2010.

Sida uu qabo ururka caafimadka aduunka ee W.H.O ayaa dhibaatada ugu badan waxaa ay dagalada ka soo gaartay ay yihiin Ilmo yaryar sanadkii 2010.

Ilmaha iyo dhalinyarada ayaa waxaa ay yihiin kuwa si ula kac leh loo bar tilmaameedsado. Ilamaha ayaa waxaa ay yihiin kuwo kooxaha hubeysan ay isticmalaan gaar ahaan kooxaha hubeysan ee Al-shabaab. Waxaa kale oo ay halis ugu jiraan in la dilo hadii ay diidan in ay ciidamadooda ka mid noqdaan.

Ilmaha ayaa waxaa ay la kulmaan karbaash, kacmo goyn iyo dil ay u geystaan ururka Al-Shabaab kuwasoo ka filiya arrimahan meelaha ay ka taliyaan.

Gabar afar iyo toban jir ah oo ka soo baxsatay magalada Baydhabo ayaa waxaa ay tiri:
“Waxaan u soo cararnay dhibaatoyin badan oo coladeed oo na heystay dartood. Waxaa ii garaacay askar ka tirsan ururka Al-Shabaab waxaa ayna sabab ugu dhigeen in aan si xun u labisnaa. Waxaa ay rabeen in aan gashto dhar adag sidaa darteed ayeeyna ii garaceen. Labo nin ayaa waxaa ay I garacday aniga oo ka soo socdo suuqa. Ka dib markii ay afar karbash igu dhufteen ayaan ka cararay.”

Ilamaha iyo dadka dhalinyara ah ee u soo cararay wadamada dariska ah ayaa ayaa waxaa ay yihiin kuwo dhibaato badan ay dagalada u geysteen isla markana ay dhibaato badan ku heyso waxbarasha laanta.

“Hoyo ka soo tagtay magalada Muqdisho ayaa waxaa ay tiri wiilkan aan dhalay oo idin hor fadhiyaa waxaa uu naafo ka ahaa hal gacan dagalada ka hor. Hadana waxaa uu naafo ka noqday dhinac dhan. Qaxaa ku dhacay qalal waxaana ka istaagay hadalkii. ”

Konfurta iyo bartamaha Somaaliya ayaa waxaa ragaadiyay dhibaato baniadan nimo taasi oo dhibaato badan ku heysa Ilamaha. Sababtoo ah kooxaha hubeysan ayaa waxaa ay ka joojiyeen gargaarkii ay heli jireen. Waxaa kale oo intaasi dheer abaar baani oo heysato ilaa 2010. Sida ururka qaramada midoobay uu qabo waxaa gargaar bani adan nimo u baahan ilaa 2 milyan oo qofood.

© UNICEF/NYHQ2009-0648/Kamber

© AP/PA Photo/Farah Abdi Warsameh

***Kor*: Koox maleeshiyo ah oo ku dhuumaneyso meel darbi ah oo ku taalo konfurta Somaaliya 2009. Wadanka dhamantiis ayaa waxaa ka taliyo kooxo hubeysan sida Al-Shabaab.**
***Bidix*: Ilmo soo barakacay oo cunta cunaayo meel ku dhaw magalada Muqdisho bishii Sebtembar ee 2009. Sida uu qabo ururka qaxootiga ee qaramada midoobay ee UNHCR waxaa dalka gudahiisa ku barakacsan ilaa 1.5 milayn dhamadkii 2010.**

Dadkii ka socday ururka Cafiska Caalamiga ah ee Amnesty International ayaa waxaa ay wareysteen ilaa caruur iyo qosaskooda bishii Marso 2009, Marso 2010 iyo June 2010. Wareeysiyadan ayaa waxaa ay ka dhaceen xarada Dadaab ee qaxootiga oo ku taalo gobolka waqoyi bari ee Kenya iyo caasimada Kenya ee Nairobi.

“Ninkeeyga iyo shan canug oo aan dhalay ayaa waxaa dilay madfac. Waxaa ay ahayd hal sano ka hor 2008. Waxaa dagaalamayay cidamada dowladda ku meel gaarka ah iyo kuwa Etoobiya oo isku garab ah iyo kooxda Al-Shabaab o oka soo hor jeedo. Hoobiye ayaa waxaa uu ku soo dhacay guriga, waxaa kale oo iga dhintay ayeeydeey iyo gabar noo shaqeyneysay iyo dad dariska ah o ona soo booqday. Waxaa isoo haray hal canug oo 13 sano jir ah.”

Haweeney da’ dhexaad ah oo ururka Cafiska Calamiga ah ee Amnesty international uu wareystay sanadkii 2009.

TAARIKHDA DHEER EE DAGAALDA

Ilaa iyo intii ay meesha ka baxday dowladii Moxamed Siyad Bare sanadkii 1991, ayaa waxaa konfurta iyo bartamaha Somaaliya halakeeyay dagaalo ku saleeysan qabaailo, tartan lagu tartamayo qayraadka, kuwo ku saleysan feker iyo mabadii.

Ka dib dagaaladii u dhaxeeyay kooxaha hubeysan iyo maxkamadihii Islaamiga ahaa ayaa waxaa ku guuleystay maxkamadihii islaamiga ahaa sanadkii 2006. Ciidamada Etoobiyaa ayaa soo galay bishii decembar ee 2006 kuwasi oo ka guleystay maxkamadihii islaamiga ahaa ayagoo awooda gacanta u galiyay dowladii caalamka aqoonsanaa ee federaalka ahayd ee la soo dhisay 2004.

Ciidamada Etoobiya iyo kuwii dowladda ku meel gaarka ahayd iyo kooxaha ka soo horjeeda ayaa dagaal ka dhex bilowday. Kumaanaan qofood ayaa dhintay iyada oo ay baqolaal kun barakaceen. Bishii Janaayo ee 2009. Shirkii Dib u heshisiinta ee Djibouti ayaa waxaa dalka ka baxay ciidamadii Etoobiya iyo ayada oo ay soo noqotay rajadii laga qabay in nolasha dadka ay hagaagto.

Rajooyinkaan ayaa waxaa ay noqdeen kuwo aan hirgalin.

Bishii Maay ee 2009 ayaa kooxaha hubeysan ee ku sugan magalada Muqdisho waxaa ay weeraro ku qaadeen ciidamada dowladda ku meel gaarka ah iyo kuwa nabad ilaalinta ee AMISOM iyo weliba gudiga uu aqoonsanayahay qaramada midoobay.

Magaaloyinka konfurta iyo bartamaha Somaaliya ayaa ayagana waxaa ka dhaco dagaalo. Dowladda ku meel gaarka ah waxaa ay ka talisaa qayb yar oo ka tirsan magalada Muqdisho halka kooxda Alshabaab ay ka taliso inta badan konqfurta iyo bartamaha Somaaliya.

DHIBAATADA DAGAALADA

Dadka ayaa waxaa ay la kulmeen dhibaato dagaalo ah oo aad u badan ayada sidoo kale caruurta ay yihiin kuwo dagalada ay sameyn weyn ku yeesheen. Shacabka dagan magalada Muqdisho ayaa waxaa ay yihiin kuwo dhibaatada ugu badan la kulmo iyada oo weli ay dagaalda sii soconayaan. Sidoo kale ayaa shacabka dagan magaaloyinka kale waxaa ay la kulmeen dagaalo sokeeye. Bishii Janaayo ee sanadkii 2010 ayaa dagaalo u dhaxeeya kooxda Al-Shabaab iyo ahlu sunna Waljamaaca kuwasi oo ka dhacay magaaloyinka Dhusamareeb iyo Beledweyne ayaa waxaa ay sababeen barakac aad u badan. Bishii oktoobar ee 2010 ayaa dagaalo u dhaxeeyo ciidamo tageersan dowladda ku meel gaarka ah iyo kooxda Al-Shabaab waxaa ay barakiciyeen ilaa 60,000 kaasi oo ka dhacay magalada Beled Xaawo ee ku taalo xadka u dhaxeeyo Kenya iyo Somaaliya.

Inta u dhaxeeysa sanadkii 2007 iyo 2009 ayaa dadka shacabka ah ee dagan magalada Muqdisho waxaa lagu garaacay madaafic iyo hobiye yaal kuwasi oo lala beeg sanayay meelaha ay shacabka aad ugu badan yihiin kuwasi oo ay geysanayeen ciidamadii Etoobiya iyo kuwa dowladda ku meel gaarka ah iyo kuwi mucaaradka ahaa. Weerarada ayaa waxaa ay ahayeen kuwo aan inta badan loo meel dayin. Wax dadaalo ah oo lagu ilaalinayay goobaha ay shacabka dagan yihiin ma jirin.

Weerarada noocan oo kale ah ayaa waxaa ay yihiin kuwo sii soconayo ilaa iyo markii ay baxeen ciidamada Etoobiya. Kooxaha hubeysan ayaa waxaa ay weeraradooda ka soo qaadan goobaha ay dadka dagan yihiin ayaga oo bar tilmaameed ka dhigta xarumaha AMISOM iyo dowladda ku meel gaarka ah taasi oo halis galisa dadka shacabka ah. Ciidamada AMISOM iyo kuwa dowladda ku meel gaarka ah ayaa waxaa ay kaga jawaabaan hoboye yaal ayagoo dhinaca waliba u rida.

© AP/PA Photo/Farah Abdi Warsameh

© AP/PA Photo/Mohamed Sheikh Nor

DAGAALADA SII SOCONAYO OO U DHAXEEYA KOOXAHA DAGAALAMAYO

Ciidamada militariga ee dowladda ku meel gaarka ah ayaa waxaa ay ka kooban yihiin ciidamo ka socodo dowladdi ku meel gaarka ahayd ee hore iyo ciidamadii sheikh shariif kuwasi oo horay u ahaa mucaarad. Ciidamada taagersan dowladda ku meel gaarka ah aayaa waxaa ka mid ah kuwa ururka Ahlu Sunna Wal jamaaca, koox suufi ah oo is hubeysay sanadkii 2008 ka dib markii kooxda Al-Shabaab ay fageen qabuurihii wadada Suufiyada ahaa oo ku bartamaha Somaaliya. Kooxda Ahlu Sunna Wal Jamaaca ayaa waxaa ay dowladda ku meel gaarka ah la saxiixatay heshiis sanadkii 2010 heshiskaasi oo aha amid militari isla markaana aqoon sanayay in kooxdani ay tahay awood ka jirta bartamaha Somaaliya. Si kastaba ha ahatee Ahlu Sunna ayaa waxaa ay si isdaba joog ah dowladda ku meel gaarka ah ugu eedeysan in aysan dhawrin heshiskii ay kala saxiixdeen.

Labada kooxood ee gacan saarka ku lahaa ka soo horjeedka dowladda ku meel gaarka ah ayaa ayaga dhexdooda waxaa ay isaga hor yimadeen dagaalo. Ururka xisbul Islam ayaa waxaa ay kala baxeen ururka Al-Shabaab bishii Desembar ee 2010.

Dhamaan kooxaha ka kala tirsan labada dhinaac ayaa waxaa laga yaaba in midba cidankooda ku wareego mida kale ama ay kaba baxaan.

Kooxda AMISOM ee nabad ilaalinta ayaa waxaa ka joogo ilaa 8000 oo askari oo ka kala socda wadamada Uganda iyo Burundi kuwasi oo ku sugan magalada Muqdisho. Waxaa ay shaqadooda tahay in ay sugaan nabad galyada xarumaha dowladda ku meel gaarka ah ee Somaaliya. Ilaa iyo markii ay baxeen ciidamadii Etoobiyaa ayaa waxaa ay ciidamada AMISOM ku lug lahayeen dagaalo Sokeeye.

***Kor*: Bishii May ee 2009: Ilmo ag joogo nin dhintay magaalada Muqdisho. Ilamaha oo arkaa dhibaato noocan oo kale ah waxaa ay u geysan kartaa waxyeelo maskaxeed.**

***Bidix*: Haweeney somaali ah iyo caruur lugeynayo goobaha lagu soo qaxay ee u dhaw magalada Muqdisho bishiiJuun ee 2009 ka dib markii ay ka soo qaxeen dagalada magalada Muqdisho.**

XADGUDUBYADA GUUD AHAAN

Ilmaha ayaa ayaa waxaa ay ka hadleen walwalka ay ka qabaan in uu dhawac soo gaaro. Gaar ahaan habeenkii markii ay huryaha jogaan, xiliyada ay waxbarashada ka yimadaan ama u socdaan iyo marka ay cuntada ka iib sanayaan suuqyada, waalidiin badan ayaa waxaa ay ilmahooda ka joojiyeen in ay Iskool adaan ayaga oo ugu cabsi qabo in ay naftooda khatar galiyaan.

Canug 15 sano jir ah oo Muqdisho joogo ayaa waxaa uu yiri:
"Waxaa iga dhintay labo wiil oo walalaheey ah. Cabdullahi oo 18 sano jir ah iyo Axmed oo 14 sano jir ah. Waxaa ay ahayd bishii Feebrayo ee sanadkii 2010. Ayaga oo suuqa bakaaraha u socdo ayaa dagaal qabsaday ka dibna waxaa ay ku dhinteen xabadihii lais wedarsanayay. Dagaalki markuu istaagay waxaan aadnay suuqa si aan meydkooda u soo qaadno."

XIRITAANKA GOOBAHA WAX BARASHADA

Canug 12 sano jir ah ayaa waxaa uu ka shekeyay sidii uu hobiye ugu soo dhacay ilaa 2 iskuul oo uu dhiganayay:
"Dugsigeygii hose waxaa uu ahaa mid suuqa bakaraha aad ugu fog. Waxaan raaci jiray bas. Iskuulka ayaa waxaa uu xirmada ka dib markii ay dagaalada bilowdeen sababtoo ah waa la duqeeyay. Waxaa ku dhintay macalimiin waxaa ay na arrintani dhacday bishii Febraayo ee 2006. Waxaa aan lahaa saaxibo badan oo ku dhintay ama ku dhawacmay iskoolka maalintaas lakiin nasiib wanaag ma anan joogin. Maalintaasi ka dib waxaan u wareegay iskool ku yiilay suuqa bakaaraha kasi oo sidoo kale ka dhacay qarax. Waxaa ku dhintay ilaa iyo lix qofood waxaana sidoo kale ku dhawacmay ilaa 3 qofood. Kuli waxaa ay ahayeen arday da'doodu u dhaxeysay 7ilaa 14 sano. Tani waxaa ay dhacday bishii Junyo ama Luuliyo 2009."

Ururka Al-Shabaab ayaa waxaa ay xadideen xaqa waxbarashada ay caruurta u leeyihiiin konfurta iyo bartamaha Somaaliya. Meelo badan oo ka tirsan konfurta iyo bartamaha Somaaliya ayaanan lahayn waxbarasha rasmi ah marka laga reebo Duqsigayada Quranka. Sida ay qabto haydadda qaramada Midoobay ee UNICEF ayaa in ka yar 23% caruurta ku nool konfurta iyo bartamaha Somaaliya waxaa ay helaan waxbarasho rasmi ah.

Sanadkii 2010 ayaa ururka Al-Shabaab waxaa ay gubeen boogay iyo iskoolad luqadda Engirisiga wax ku bari jiray oo ku yilay degmada Afmadow.

Gabar 14 sano jir ah oo ka timid Baidhabo ayaa waxaa ay tiri:
"Mararka qaar waxaa iskookeena imaan jiray kooxda Al-Shabaab waxaa ayna garaaci jireen macalimiinta iyo ardayda. Waxaa ay dileen mid ka mid ah macaliminteena. Waxaa nala yiri ka baxa iskoolka halkani wax kuma barneysane. Xiligaasi waxaa ku qasbanaaday in aan guriga u soo cararo. Waxaa ay dileen nin macalin noo ahaa."

QOYSASKA KALA BURBURAY

Dagaalada aan la saadalin Karin ayaa waxaa ay sababeen barakaca qoysas badan. Barakacani ayaa waxaa uu sababay in ilmo badan iyo walidiintood ay kala dhumaan tasi oo keentay in ay san helin wax tageero ah.

Dad badani oo somaali ah ayaa waxaa ay bil waliba imanayaan xerada qaxootiga ee Dadaab. Dadka ka shaqeeyo gargaarka ayaa waxaa ay soo tabinayaan in maalin waliba ay imaanayaan ilmo aysan walidintood la soconin. Ilmahan ayaa waxaa ay la socdaan dad kale oo ay isku qabiil yihiin ama ay daris ahayeen. Ilamaha aanan dad la soconin ee yimaado xerada qaxootiga ee Dadaab ayaa waxaa ay inta badan waxaa lagu wareejiyo dad ay la nolaadan ayaga oo anan guryahay wax howl ah ka qabaneynin.

Canug 16 jir ah oo aysan walidiintis la soconin oo ku nool xerada Dadaab ayaa waxaa uu yiri:
"Hadii adan walidkaa la soconin waxaa guriga ka bax lagu dhihi karaa daqiiqad kasta."

© Private

© AP/PA Photo/Farah Abdi Warsameh

***Kor*: Xaqa ay ilamaha Somaaliyeed u lahayeen waxbarashada ayaa waxaa uu haa mid lagu tuntay 20 sano ee la soo dhafay. Hadeertaan ma jiraan wax iskoolad ah oo ka shaqeeyo qaybo badan oo ka tirsan Somaaliya. Sida sawirkan ku cad caruurtani waxaa ay baranayaan quraanka waxaa ayna joogan meel muqdiso u jirto ilaa 20 kilomitir. Waxaa sawirkan la qaaday bishii Abriil ee 2008.**

***Bidix*: Haween iyo caruur ka cararaayo magalada Muqdisho dagaalo u dhaxeeyo kooxaha Islaamiyiinta iyo dowladda ku meel gaarka ah bishi Luuliyo ee 2009.**

YAA CANUG AH

Sida uu qarayo heshiska qaramada midoobay ee caruurta waxaa canug ah qof kasta oo ka yar 18 sano marka laga reebo hadii shuruucda wadanka ay qorayaan in qof uu ku qan gaari karo wax ka yar 18 sano.

Inkasta oo ay tahay Somaaliya mid ka mid labada dal ee aduunka oo aan ansixinin heshiiska qaramada midoobay ee caruurta ayaa hadana waxaa uu dastuurka federaalka ah qorayaa in ay reebantahay in ilmaha da'doodu ka yartahay 18 si qasab ah logu shaqeysto ama logu askareysto. Waxaa kale oo dastuurka federaalka ah ku qoran in ay mamnuuc tahay in ilmaha iyo dadka waweyn laisla galiyo xabsi.

CARUURTA LA ASKAREEYSTO

Ilmaha ay da'doodu ka yartahay 15 sano oo colaada laga qayb galiyo ama dagaalada sokeeye loo adeegsado ayaa waxaa ay tahay dambi dagaal.

Dadka qaxootiga ah ee somaaliyeed ayaa waxaa ay sheegayaan in caruurta si aad ah loo askareysto gaar ahaan ay askareystaan kuwa ka soo horjeeda dowladda ku meel gaarka ah. Meelaha qaar ayaa ayaa hogaamiye yaasha Al-Shabaab waxaa ay bar tilmaameed sadaan ilahamaha yaryarka ah iyo dhalin yarada. Halka magalooyinka Muqdisho, Kismayo, Bravo iyo Baidhabo ilamaha iyo dadka dhaqlin yarada ah loo askareysto si qasab ah.

Haweeney ayaa waxaa ay ururka cafiska Calamiga ah u sheegtay.
"Wiilkeyga waxaa xaafadeeyda ka kaxeystay Al-Shabaab waxaa ayna geysteen goob ay dadka ku taba baraan. Waxaa xerada lagu hayay mudo dhan labo isbuuc asaga iyo wiilal kale oo ay isku da' ahayeen. Waxaa uu jiraa 10 sano waxaana loo adeegsaday wilal kale si uu ugu biiro."

QAABABKA ILMAHA LOO ASKAREYSTO

Ilmo badan ayaa waxaa ay soo wariyeen in kooxaha hubeysan ay yimadaan guryahay iyo goobaha waxbarashada. Waalidiinta ilmahani dhalay ayaa waxaa lagu sameyaa handadaad hadii ay diidaan in ilmahooda la askareysto. Qoysas tira badan ayaa ay ka soo carareen Somaaliya ayaga oo la soo cararay ilmahooda isla markaana ugu cabsi qabo in la askareysto.

Canug 13 jir ah oo magalada Muqdisho bishii Abriil ee 2010 ayaa waxaa uu yiri:
"Dagaalyahanada Al-Shabaab ayaa waxaa ay yimadeen iskookeena waxaa ayna nagu dayeen in aan ka mid noqono. Hadii ay hooyada diido in canugeeda uu ka mid noqdo wa ay dilaan ama wa ay garacaan."

"Waxaa ay imaan jireen iskoolaadka xiliga ardayda ay isu timaado waxaa ayna macalimiinta ka codsan jireen in ay ardayda la hadlaan oo ay u shegaan in ay dagaalka ka qayb galaan. Inkasta oo ay ardaydu diidi jireen hadana waxaa ay wadan jiraan qaar. Hoyadeey aniga way diiday in aan dagaalka ka qayb galo."

"Waxaa jiray xili ay na garaceen anaga oo joogna iskoolka. Anaga oo 20 arday ah ayaa waxaa nagula garaacay shabuug ama karbaash. Mararka qaar xiliyada ay ardayda isu timaado waxaa ay weydiin jireen kuwa aan tageer saneyn in ay gacanta taagtaan. Hadii ay dhacdo in ay jiraan dad gacanta taagto waa ay garaaci jireen."

"Waxaa ay isku dayeen in walaalkeey uu u dagaalamo lakiin wuu ka diiday xitaa ka dib markii ay gurigeena yimadeen oo ay isku dayeen in ay qasbaan. Hoyadeey way iska aamusneyd. Waxaa ay ku guuleysteen sanadkii 2009 in ay asaga oo jira 14 sano ay wataan. Ilaa hadda ma naqaano meesha uu ku sugan yahay hal mar ayaan arkay ilaa intii la watay asag oo caruur kale la saran baabur."

QAABABKA ILAMAHA LOO ASKAREYSTO

Caruurta ayaa waxaa isticmaalo kooxaha hubeysan waxayna gaar ahaan u isticmalaan in ay soo jaajusaan ama ay miinoyin jidadka soo galiyaan. Qaar ayaa waxaa loo isticmaalay fulinta shareecada islaamka gaar ahaan tujumaada ay ka bixiyaan ururka Al-Shabaab. Qof ka mid ah qaxootiga ayaa waxaa uu ka shekeeyay sida uu goob joog ugu ahaa wiil yar oo karbashayay haween iyo gabdho yar yar oo wadanin xijaab.

Sadex wiil oo Muqdisho ka soo carartay 2007 ayaa waxaa ay ururka Cafiska caalamiga ah u sheegeen in ay arkeen wiilal yar yar oo isqarxiyay.
"Dad ayaa waxaa ay bam ku xireen korkooda ka dibna waxaa lagu amray in ay aadan goobaha ay dowladda ku meel gaarka ah ka taliso. Intaa ka dib ayaa waxaa qarxay bam-kii. Arrinkan ayaa waxaa uu qabsaday saxiibkeen Xuseen waxaa na ku qasbay qolada Al-Shabaab."

Dowladda ku meel gaarka ah iyo Ahlu Sunna Wal Jamaca ayaa ayagana waxaa lagu eedeyay in ay askareystaan ilamaha ay dadoodu ka yartahay 18 sano. Bishii Juun ee 2010 ka dib markii ay saxaafada aad u soo tabisay ilamaha joogo goobaha isbaarooyinka ah ayaa madaxweyne Sheikh Sharif Sheikh Axmed ayaa waxaa uu amar ku bixiyay in la soo baaro arrinkani. Ilaa hada weli lama oga wixii ka soo baxay baaritaankan. Wariyihii arrinkani ka shaqeynayay ayaa waxaa uu ku qasbanaday in uu soo cararo asaga oo ka baqay in la xiro.

Inkastoo wiilasha yar yar iyo kuwa dhalinayrada ah ay yihiin kuwa inta badan la adeegsado ayaa hadana waxaa aan ka marneyn gabdhaha. Gabar da'deedu tahay 19 sano ayaa waxaa ay ururka Cafiska Caalamiga ah ee Amnesty International u sheegtay:
"Al-Shabaab waxaa ay leeyihiin xafiis qaabilsan dadka rabo in ay si mutadawac nimo ah ula shaqeeyaan. Mararka qaar waxaa ay dadka siinayaan lacag. Gabdhaha ayaa waxaa lagu qasbaa in ay cuntada u kariyaan ama ay biyaha u qaadan. Tuulo waliba oo ay ka taliyaan waxaa ay leedahay dad mutadawaciin ah."

Haweeney ayaa waxaa ay ururka Cafiska Caalamiga ah u sheegtay:
"Waxaa ugu badan ee sameeyo gabdhaha waa guurka degdega ah. Arrinkani ayaa inta badan waxaa sameeyo Al-Shabaab iyo kooxda kale ee Xisbul Islaam. Waalidiinta inta badan ma qasbaan ilmahooda lakiin Al-Shabaab iyo Xisbul Islam wa ay dilayaan cidii ka hortimaado."

Gabdhaha ayaa waxaa mararka qaar lagu qasbaa in ay guursadaan nimanka dableeyda ah. Dhibaatada noocan ah lama qiyaasi karo sababtoo ah wax ka soo waramo ma jiraan. Gabar 13 sano jir ah oo Baydhabo ka timid ayaa waxaa ay ururka Cafiska Calaamiga ah ee Amnesty International u sheegtay:
"Gabdhaha ayaa waxaa kufsado Al-Shabaab. waxaa la kufsaday qof ka tirsan qoyskeyga lakiin idiin ma sheegi karo qofka ay tahay."

© Private

© AP/PA Photo/Mohamed Sheikh Nor

***Kor*: Caruur Somaali ah oo cayaarayo cayaar dagaal.caruur badan oo Somaaliyeed wax aan dagaal ahayn ma garanayaan. Agoosto 2008.**
***Bidix*: Ilmo weelal gacanta ku heysta oo sugayo in cunto loo qaybiyo xerao qaxooti oo ku taalo Muqdisho bishii Janaayo ee 2010. In ka badan ilaa 2 milyan oo Somaali ah ayaa waxaa ay u baahan yihiin gargaar bani adan nimo.**

MAXAA LOO YAQANAA CARUURTA LA ASKAREYSTO

Waxaa canug askari ah loo yaqanaa canug kasta oo da'diisu ka yartahay 18 sano kasi oo loo adeegsaday in uu ka mid noqdo ciidan hubeysan. Waxaa ka mid ah ilmaha askarta cuntada u kariyo, kuwa soo jajuso, ama kuwo fal galmoodka lala sameeyo. Kuma koobna oo kali ah kuwa dagaalada ka qayb qaadano ama qoriga wato.

XADGUDUBYADA TILMAAMAN

Qof waliba oo loo arko in uu xiriir la leeyahay dowladda ku meel gaarka ah ayaa waxaa uu halis ugu jiraa in la dilo, la afduubto ama la jir dilo ayada oo ay sidani sameynayaan kooxaha hubeysan ee dowladda ku meel gaarka ah ka soo hor jeedo. Ilmo badan ayaa weerarada noocan oo kale ah waxaa ay ku wayeen walidiin tood.

Canug da'diisu jirto 17 sano oo Baydhabo ka soo cararay bishii Maarso ee 2010 ayaa waxaa uu yiri: *"Kooxaha islaamiyiinta ah ayaa waxaa ay dileen aabaheey sanadkii 2009. Tani ayaa waxaa ay ahayd markii ciidamadii Etoobiyaanka ahaa ay baxeen. Aabaheey waxaa uu ahaa askari ka tirsan dowladda ku meel gaarka ah da'diisuna waxaa ay ahayd 60 jir. Habeen habeenada ka mid ah markii ay sacadu ahayd 8 fiidnimo ayaa waxaa gurigeena yimid ciidan ka tirsan Al-Shabaab waa ayna la baxeen isla markaana waay dileen. Aabaheey waxaa uu u dhintay in uu dowladda ku meel gaarka ah ka tirsanaa darteed. Waxaa dilay afar nin oo aan daris ahayn oo ku hubeysnaa bistoolado. Afartani nin cid ogeyd ma jirin in ay Al-Shabaab ka tirsanayeen. Markii hore waxaa ay aabaheey ku dhaheen waxaan rabnaa in aan arrin kala hadalno lakiin banaanka waa in aad noo raacdaa. Markii uu ka yeelay oo uu raacay ayaa aay toogteen. Mar sii horeysay ayaa ay u hanjabeen lakiin xiligaasi aabaheey wuuba ka baxay dowladda ku meel gaarka ah. Dad badan oo aan isku xaafad ahayn oo dowladda ku meel gaarka ah ka tirsanaa aya sidaan oo kale lagu dilay."*

Sanadadii 2009 iyo 2010 ayaa waxaa sii badanayay dilalka, gacmo goynta iyo karbaashidda ay fulinayaan kooxaha mucaaradka ayaga oo inta badan ku fuliyo lagu eedeeyo in ay wax xadeen ama ay falal galmo ku lug leeyihiin. Sharciyada noocan oo kale ah ayaa waxaa fuliyo xaakimiin gacan saar la leh kooxda Al-Shabaab.

Dad badan ayaa waxaa ay muteysteen ciqaab sababtoo ah waxaa loga shakiyay in ay ka soo horjeedaan mabadi'da Al-Shabaab. Ciqaabaha inta badan waxaa lagu fuliyaa meelaha fagaaroyinka ah si dadka loo kontorola.

Canug ka soo cararay deeganka Saakow ee gobolka Jubada dhexe bishii Abriil ee 2010 ayaa waxaa uu yiri: *"Al-Shabaab ayaa waxaa ay tuuladeena ka talinayeen muddo dhan 2 sano. Dadka ayeey ciqaabi jireen ayada oo aysan jirin wax sabab ah taasina waxaa ay nolasha ka dhigtay mid adag. Waxaa ay isticmaalin jireen karbaash ay ka sameyeen tayarada baaburta waxaana ku qasbaneyn in aan siino canshuur markii uu dalagga no soo go'. Nin aan qaraabo nohay ayaa waxaa laga goyay gacanta sababo la xiriira asaga oo siin wayay canshuur darted. Gacmaha ayeey ka xireen wayna wateen. Maalintii xigtay ayeey asaga oo gacanta ka go'antahay ku soo celiyeen tuulada. Gacanta waxaa ay kaga goyeen mindi."*

Kooxaha hubeysan ee islaamiyiinta ah ayaa waxaa ay sidoo kale ciqabaan caruurta.17 jir ka yimid magalada Muqdisho ayaa waxaa uu yiri: *"Waxaa ay ahayd bishii Janaayo ee 2010 waxaan la socday gabdho aan isku iskool nahay waxaana na joojiyay kooxda Al-Shabaab waxaa ayna weydiyeen kooxda aan taagersanahay. Kama anan jawabin waan iska aamusnay ka dibna way na karbasheen ka dibna waan iska soconay markii ay na fasaxeen."*

Markii ay tarikhdu ahayd 27 bishii Oktoobar ee 2010 ayaa waxaa meel fagaaro ah lagu toogtay labo gabdhood oo dhalin yaro ah magalada Baladweyene ee gobolka Hiiran. Waxaa lagu eedeyay in ay ahayeen jawasiis.

JOOJINTA GARGAARKA

Al-Shabaab waxaa ay si baaxsan u joojisay gargaarkii bani adan nimada ee konfurta iyo bartamaha Somaaliya taasi oo halis galisay shacabka iyo caruurta. Sida ay soo tabineyso hay'adda qaramada midoobay u qaabilsan caruurta ayaa mid ka mid ah lix dii canug ay la ildanan yihiin nafaqa darro. Caqabada jira waxaa ka mid ah ka mamnuucida hay'adaha gargaarka iyo kuwa qaramada midoobay ama kuwa soomaalida goobaha ay ka taliyaan. Waxaa kale oo jira in hay'adaha lagu eedeyay in ay beesha caalamka u jajusayaan.

Hay'adda cuntada aduunka ee qaramada midoobay ee loo yaqaano WFP ayaa waxaa laga mamnuucay in ay howlgasho bilowgii 2010 inkasta oo ay jirto abaar aad u ba'an sanadkan 2010. Ururka Al-Shabaab iyo Xisbul Islaam ayaa waxaa si cad u shegeen in ururada gargaarka aysan marnaba ka hawl gali donin goobaha ay ka taliyaan.

Al-Shabaab ayaa waxaa ay sidoo kale ay ku qasbeen in ay biyaan canshuur hay'addaha gargaarka, kuwa becsharada shaqsiyaadka iyo beeraleeydaba.

© AP/PA Photo/Mohamed Sheikh Nor

Haweneey 25 sano jir ah oo haysato sadex caruur ah ayaa waxaa ay tiri: *"Waxaan Somaaliya iyo beerteni ugu soo cararnay waxaa ka soo go' oo aan nagu filneyn dartood. Dalageena qayb badan oo ka mid ah ayaa waxaa naga qaatay Al-Shabaab, Waxaana daganeyn Jamaame. Gurigeena ayeey yimadeen waxeyna naga qateen wixii yaalay oo dhan. Wax dhibaato shaqsi ah nooma geysanin lakiin wa ay na bililiqeysteen. Ilmaheeyga ma aysan haysanin wax cunto ah waxaan muddo dhan sadex maalmood u soo lugeyneynay magalada Kismaayo. Dad joogay magalada Kismaayo ayaa na soo caawiyay ka dibna waxaan ku guuleysanay in aan nimaadno xerada qaxootiga."*

DHIBAATOYINKA MASKAXEED

Dhamaan dadkii Somaaliyeed ee uu la kulmay ururka Cafiska Caalamiga ah ee Amnesty international ayaa waxaa ay ahayeen kuwo ku soo nolaa dagaalo dhexdood, ama kuwa dagaalada ku wayay dadkooda ama saxiibadood iyo kuwo goob jog u ahaa qof la dilaayo ama la jir dilaayo. Sida ay noo sheegeen dadka ka shaqeeyo gargaarka ee ku nool xeryahay qaxootiga dadka Somaaliyeed ayaa waxaa ay yihiin kuwo leh cuduro badan oo ay ka mid yihiin Qalalka, hurdo la'anta, xanaaq tiro badan iyo cudurada maskaxda.

Xeryahay ayaa waxaan aysan haysanin dadka ku taqasuusay u dhimrinta dadka qabo dhibaatoyinka aan kor ku soo sheegnay. Waxaa sidoo kale jiro takoor badan oo ku wareegsan dadka ka cabanaayo dhibaatoyinkan. Haweeney uu ninkeedii iyo shan caruur ah oo ay dhashay kaga dhinteen hoobiye ku soo dhacay gurigeeda oo ku yalay magalada Muqdisho ayaa waxaa ay tiri:

"Maskaxdeeyda way maqantahay inta badan sababo la xiriiro dhibaatooyinki an kula kulmay Somaaliya dartood. Dadka aniga oo kale ah halkan kuma heystaan wax tageero ah. Waxaa fiicnan lahayd in aan helo la talin ku aadan sidii aan isaga ilaabi lahaa."

JIIL LUMAY

Labaatan sano oo dagaalo Sokeeyo ah iyo cunaqabateynta xagga wax barashada ah ee gor dhaw lagu so rogay caruurta Somaaliyeed ayaa waxaa ay ka dhigeeysaa kuwo aad u liito. Dadka ka shaqeeyo gargaarka ee jooga xeryahay qaxootiga ayaa waxaa ay sheegayaan in ay aad u adag tahay in ilmaha Somaalida la geeyo Iskooladka dalka Kenya ama ay waxbarasho la galaan ciyaalka kenyaatiga ah. Ilmo badan ayaa waxaa ay ku qasban yihiin in ay bilabaan dugsiyada hoose dhexe ayaga oo da'doodu ka weyntahay.

***Kor*: Mid ka mid ah askarta Al-Shabaab oo karbaashayo wiil dhalinyaro ah oo lagu eedeyay in uu dambi galay ka dib markii uu xukumay xaakin ayaga ka tirsan. Arrinkan ayaa waxaa uu dhacay bishii Maarso 2009 waxaa uuna ka dhacay magalada Muqdisho.**

Dhamaan ilmihii la hadlay ama la kulmay ururka Cafiska Caalamiga ah ee Amnesty International ayaa waxa ay sheegeen in ay jeclan lahayeen in ay wax bartaan si ay u helaan shaqo, ama ay noolashooda si sharaf leh kor ugu soo qadaan.

© UNHCR/E. Hockstein

XASUUQA DABADA DHEERAADAY

Inksata oo baaxdada xadgudubyada xaquuqda aadanaha iyo xasuuqa ka soconaayo somaaliya uu sii socdo sida dambiyada dagaalka ama xasuuqa. Waxaa muhiim ah in la bilaabo la xisaabtan iyo cadcadaan si loo difaaco caruurta Somaaliyeed.

Sida uu u sheegay ururka Cafiska Caalamiga ah ee Amnesty International canug yar:
"Al-Shabaab ayaa waxaa ay aad u askareystaan caruurta, sidaan ayaa waxaa ay u sameeynayaan ayaga oo aysan jirin cid daba galeeyso."

***Kor*: Caruur tartamayo oo joogo xerada qaxootiga ee IFO oo ku taalo Dadaab ee ku taalo dalka Kenya bishi Deseembar ee 2008. Xerada ayaa waxaa ay hooy u tahay ilaa iyo 300,000 kun oo qaxooti Somaali ah.**
***Booga hore*: Haween iyo caruur ka cararaayo magalada Muqdisho dagaalo u dhaxeeyo kooxaha Islaamiyiinta iyo dowladda ku meel gaarka ah bishi Luuliyo ee 2009.**

TALAABO KA QAAD

Talaabada aad qaadi karto waxaa waye adiga oo waco waziirkaga arrimaha dibadda si uu gacan ugu geysto horumarinta caruurta isla markaano loo joojiyo xadgudubyada xaquuqda aadanaha.

Fadlan waziirka weydii in uu:

- In uu joojiyo hubka la siinaayo kooxaha isku haayo Somaaliya kaasi oo inta badan lagu geysto xadgudubka xaquuqda aadanaha.
- Ka codso qaramada midoobay in ay saarto guddi soo baaro xadgudubyada sharciga caalamiga ah gaar ahaan xadgudubyada caruurta, iyo in ay soo jeediyaan talo ku aadan la xisaabtanka kuwa ku lugta leh.
- In dhaqaale lagu bixiyo waxbarashada Caruurta Somaaliyeed iyo caafimaadkooda gaar ahaan kuwa ku jiro xeryaha qaxootiga iyo kuwa dadka soo barkacay.

AMNESTY INTERNATIONAL

Ururka Cafiska caalamiga ah waa dhaqdhaqaaq caalami ah oo ay ka mid yihiin ilaa 3 malyuun oo qof oo ah tageero yaal, xubno iyo dad u dhaqdhaqaaqo kuwasi oo ku kala nool 150 dal oo dhul isla markaana u dhaqdhaqaaqo xaquuqda aadanaha.

Ujeedadeena waxaa ay tahay in qof waliba oo ku raxeeysto xaquuqaha ku xusan baaqa caalamiga ah ee xaquuqda aadanaha iyo xaquuqda aadanaha ee caalamiga ah.

Waxaa aan xor ka nohay dowladaha, fekredaha siyasadeed, kuwa dhaqaale iyo dimeedba.

Lambarka: AFR 52/002/2011
Somali

Luuliyo 2011

Amnesty International
International Secretariat
Peter Benenson House
1 Easton Street
London WC1X 0DW
United Kingdom

amnesty.org